



# AGABKA ISU DIYAARINTA GURMADKA



## Liiska Waxyaabaha la libsado:

Marka hore ka fikir aasaaska nolosha qoyskaaga, gaar ahaan cuntada iyo biyaha. Ka fikir laba agab. Mid, ku rid wax kasta oo adiga iyo qoyskaagu u baahan doontaan si aad u joogtaan halkiina. Kan kale waa inuu noqdaa shay aad qaadan kartaan hadday dhacdo inaad qaxdaan. Hubso inaad dib-u-eegto agabkaaga si joogto ah si aad u hubiso in waxa ku jiraa, gaar ahaan cuntada iyo daawadu, saafi yihiin.

### Aasaaska diyaarinta Agabka Diyaarsanaanta (Preparedness Kits) ee gurigaaga, shaqada ama dugsiga iyo baabuurka:

- Biyaha – hal galaan oo biyo ah qofkiiba, maalintiiba, ugu yaraan saddex maalmood (loogu talagalay cabbista iyo nadaafadda)
- Cuntada aan halaabin – ugu yaraan saddex maalmood cunto aan halaabin, oo diyaar u ah in la cuno
- Raadiyaha beetariyada ku shaqeeya/raadiyaha gacanta lagu wareejiyo
- Raadiyaha Digniinta Cimilada NOAA
- Beetariyada (AAA, AA, C, D, 9-foot)
- Toosh
- Agabka gargaarka degdegga
- Qalab ujeedooyin badan loo isticmaali karo
- Siidhi
- Tuwaal jeermiska dila
- Jawaanada qashinka iyo xadhkaha baca
- Weji-daboolka boorka
- Buuxiyaha tilifoonka gacanta
- Buuxiyaha USB ee lagu wareejiyo gacanta (waxaa dhici karta in lagu soo daro raadiyaha lagu wareejiyo gacanta)
- Bustayaal la siiyo qof kasta
- Hagoogta roobka
- Alaabta nadaafadda qofka (caday, cajiin, tirtirka nadaafadda, saabuun, tuwaal, iwm.)
- Dawooyinka dhakhtarka qoro (waxaa lagu talinaa saadka todoba maalmood)
- Lacagta caddaanka
- Qasaacad fure
- Waraaq iyo qalin wax lagu qoro
- Alaabta rabbaayaddaada (raashin, biyo, buste, daawo)
- Alaabta carruurta (xafaayado, caanaha foormula, raashinka cunugga, buug la midabeeyo/qalmaanta midabeedyo)

### Waxyaabaha kale ee ay tahay inaad ku haysato guriga iyo shaqada ama dusiga:

- Weel 7 galaan oo biyo qaada
- Bacda lagu daboolo darbiyada iyo sharooto
- Bustayaal dheeraad ah
- Dab dammiye
- Qalabka lagu dareemo kaarboon mono oksaydh
- Kalbado ama biinso lagu xidho danabka
- Xaaqe
- Badiisha barafka
- Dhalaaliyaha barafka
- Carro/xaanada aan isku dhaganeyn
- Alaabta qabawga ka celiso qasabadda dibadda/daboolada
- Kariyaha dibadda iyo shidaalka (dibadda oo kaliya lagu isticmaalo)
- Xaabada iyo kabriidada biyaha iska celiya (loo isticmaalo gubidda xaabada ama dibadda oo kaliya)
- Qalabka nadiifinta biyaha
- Alaabta caafimaadka (qalabka kaalmeeya maqalka iyo beetariyada, okayaalayaasha, muraayadaha la geliyo indhaha iyo milanka, cirbadaha, baakoorta)
- Alaabta tixraaca gurmada sida buugga gargaarka degdegga
- Dareeraha kalooriinta (chlorine) guriga (aan udgoon lahayn laguna darin nadiifiyayaal) daawo dhibciye
  - Waxaad caddeeyaha (bleach) u isticmaali kartaa sida jeermis dile ahaan (waxaad sagaal qaybood oo biyo ah ku qastaa hal qayb oo caddeeye ah). Haddaanad biyaha karkarin karin, xaaladda gurmada ah waxaad sidoo kale isticmaali kartaa caddeeye (bleach) si aad u nadiifiso biyaha. Ku dar 1/8 oo qaadada qaxwada (ama 8 dhibcood) oo dareeraha caddeeyaha (bleach) guriga, ee caadiga ah, aan udgoon lahayn, halkii galaan kasta oo biyo ah, si fiican u walaq kaddibna sug 30 daqiiq intaanad isticmaalin.
- Raadiyaha laba dhinaca u shaqeeya
- Nalka ammaanka/iftiinka bililiglaha
- Beetariyo dheeraad ah (AAA, AA, C, D, 9-foot)